

## MAAMULKA ARRIMAHA ILMAHA IYO WAXBARASHADA

### LIFAAQA 1-AAD

## Warbixin kooban oo ku saabsan qorshaha hawlgallada iskuulada ee loogu ciribtiro maandooriyeyaasha

### Qeexitaan

Macnaha guud ee ereyga maandooriye, wuxuu noqon karaa khamriga, daroogada, sigaar-cabbida/tubaakada, dhuuxida iyo waxyaalaha kiciyeyaasha leh iyo dawooyinka kuwaasoo qaabdarro loogu isticmaalo, iyo maandooriyeeyaasha internetka.

### Tallaabo ka qaadista maamulka iskuulka ee ku salaysan kahortegidda

- Kooxda arrimaha caafimaadka ee ardayda (elevhälsoteam) oo aan qabyo ahayn
- Wadashaqaynta qoyska iyo Maamulka iskuulka
- In shaqaalaha la garowsiiyo in ardayda u noqdaan kuwa kudayaso fiican ah
- Wadahadalka caafimaadka xiriirka la leh oo la badsho
- Tallaabo ka qaadista aan daahid lahayn dhinaca Maamulka iskuulka oo lagu maareeyo ardayga ka maqnaanshada aan ruqsad loo haysan
- Warbixin iyo tababar dheeraad oo shaqaalaha loogu talagalay
- Waxbarid ulajeedadeeda tahay sare u qaadka aqoonta ardayda iyo garowsiga wixii xiriir la leh maandooriyeyaasha
- Tallaabo ka qaadids ku aadan, sida tusaale warbixin cusub oo xilhaayeha xannaanadda/waalidka loogu talagalay
- Isku-xirida wadashaqaynta Maamulka iskuulka iyo Maamulka adeegga bulshada, dhaqamada iyo ciidanka booliska.

### Calaamadaha lagu garto markii qofku maandooriye u ku markhaansan yahay

- Dhaqan-xummo iyo bulshada inteeda kale usan la qabsan karin
- Hoos u dhaca kartida waxbarashada
- Xoog-saariddarro
- Dadaalkii dugsi-dhigashada oo aan dheelitirnayn
- Saacadaha iskuulka u ka soo daaho, ka maqnaansho aad u badan, maqnaansho xisadaha oo aan la macnayn karin
- Xatooyo, adeegsashada xoog-muquunis iyo hanjibaad
- Iskhorimaad jeclaan
- Badsashada beenta iyo ballama usan oofin

### Waajibka wargelinta

Dhammaan dadka ka shaqeeya goobaha ilmaha iyo dhallinyarada aan 18 sano buuxsan, waxaa waajib ku ah tixgelinta waajibka wargelinta sida hadba waafqsan cutubka 14-aad qodobka 1-aad § Maamulka adeegga bulshada.

## Ilmaha iyo waxbarashada

### **Haddii arday isagoo iskuulka ku sugan laga shakisan yahay in uu khamri u soo cabbay:**

- Waa in ardayga gacanta lagu haya oona mar kasta qof wayn u kormeera
- U yeer ambalans haddii u aad u sakhraansan yahay ama aan la ogayn wax u ku markhaansan yahay
- Ka qaad dhallooyinka/khasacadaha, taasoo waafaqsan cutubka 5-aad, qodobka 22-aad Sharciga dugsiyada
- La xiriir madaxda iskuulka, kooxda arrimaha caafimaadka ee ardayda (elev hälsoteam) iyo xilhaayeha xannaanadda/waalidka haddii da`da ardayga ay 18 sano ka hooseeyso. Haddii u qaangaar yahay waa in oggolaansho ku saabsan xiriir dheeraad laga hela
- Waa in walwalka jiro Maamulka adeegga bulshada la wargeliya
- Haddii laga shakisan yahay in qof da`yar ah khamri loo soo iibiyay ama uu isga iibinayo, waa in arrintaas agaasimaha iskuulka la wargeliyaa, kaasoo isagana la xiriiri doono kooxda arrimaha caafimaadka ee ardayda (elev hälsoteam). Waa in xitaa ciidanka booliska la wargeliyaa.

### **Haddii arday isagoo iskuulka ku sugan laga shakisan yahay in uu maandooriye ku markhaansan yahay:**

- Waa in ardayga gacanta lagu haya oona mar kasta qof wayn u kormeera
- U yeer ambalans haddii u aad u sakhraansan yahay ama aan la ogayn wax u ku markhaansan yahay
- La xiriir madaxda iskuulka, kooxda arrimaha caafimaadka ee ardayda (elev hälsoteam) iyo (föreybyggande ungdom). Kaddib wadajir ayaa xilhaayeha xannaanadda/waalidka loola xiriirayaa (waa haddii da`yarka usan weli 18 sano buuxsan). Haddii u qaangaar yahay waa in oggolaansho ku saabsan xiriir dheeraad laga hela
- Haddii la xaqiijiyo in ardayga uu maandooriye ku markhaansan yahay waa in Maamulka adeegga bulshada la wargeliyaa

### **Armaajada ardayda**

Armaajada ardayda waxaa iskaleh iskuulka. Laakinse ardayda way isticmaali karaan waa haddii ay tixgeliyaan nidaamka u degsan isticmaalka armaajada. Maamulka iskuulka wuxuu xaq ku leeyahay in uu hubsado in armaajada loo isticmaalay qaab waafaqsan nidaamka u degsan.

### **Shandhadaha**

Shandhadaha waxaa iskaleh ardayda mana la baari karo. Haddiise loo baahdo in la baaro waxaa loo yeerayaa ciidanka booliska.

## Ilmaha iyo waxbarashada

### **Eeyga maandooriyaha/daroogada**

Markii la baarayo goobaha iskuulka waxaa dhici karto in la adeegsado eeyga booliska. Ulajeedada waxay tahay in la hubso in iskuulka usan oolin waxyaalaha maanka dooriya, nooc kastaba ha ahaadeen.

### **Faahfaahinta xiriirka ee lamaanayaasha wadashaqaynta**

Kooxda iskuullada (Skolteam)	0224 - 74 96 81, 74 96 83
Kahortegidda dhallinyarada (Förebyggande ungdom)	0224 - 74 96 35, 74 96 43
Goobta dhallinyarada	0224 - 74 78 52
Xafiiska muwaadiniinta [Medborgarkontoret]	0224 - 74 00 00
Madaxa amniga (Säkerhetschef)	0224 - 74 78 82
Ciidanka booliska (Kommunpolis)	010 - 567 53 73